



**WASAARADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA
IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA**

**WAXQABADKA
WASAARADDA
2022 - 2024**



MAARSO 01, 2023

ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEDKA DHOWRISTA XUQUUQDA MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA

Sharcigan wuxuu ilaalinayaa xuquuqda maalgashatada iyo maalgashigooda si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda dalka, isla markaana wuxuu dhiirigalinayaa in dalkeena la maalgashto.



MAAJO 09, 2023

DAAH-FURKA MADASHA ISKU-DUWIDDA DEEQAHA HORUMARINTA DALKA (DCF)

Wasaaradda ayaa daah-furtay madashan si loo dardargeliyo wixtarka deeqaha horumarinta kuwaasoo waafaqsan qorshayaasha mudnaanta u leh Qaranka Soomaaliyeed iyo ballanqaadyada iskaashi ee horumarinta caalamiga ah.



MAARSO 28, 2023

DAAHFURKA WARBIXIN MUUQAALDKA DHAQAALAH SOOMAALIYA

Waa warbixin ka tarjumeysa Muuqaalka Dhaqaalaha Soomaaliya, isla markaana faahfaahinaysa waxqabadka tilmaamayaasha dhaqaalaha guud, horumarrada dhaqaale ee u dambeeyay, siyaasadda dhaqaalaha guud, siyaasadda deymaha, maamulka maaliyadda iyo dhaqaalaha iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo saadaasha.



JUUN 05, 2023

DAAH-FURKA MADASHA ISKU-DUBBARIDKA GARGAARKA BANI'AADANNIMO OO HOOS TAGTA NIDAAMKA DEEQAHA EE SOOMAALIYA

Madashan ayaa waxaa looga golleeyahay in lagu xoojiyo wada shaqaynta iyo isku sku-dubbaridka dadaallada dowladda iyo kuwa hey'adaha gargaarka ee lagula tacaalayo arrimaha bani'aadannimo.



AGOOSTO 29, 2023

DAAH-FURKA QAAB-DHISMEEDKA WADASHAQEYNTA CUSUB EE ISKU-DUWIDDA DEEQAHA

Qaabkan cusub ee Isku-duwidda deeqaha ayaa ujeedkiisu yahay in la fududeeyo wadashaqeynta iskaashiga iyo isku-dubbaridka deeqaha la siiyo wadenkeena Soomaaliya. Si loo meeleeyo islamarkna la hubiyo in deequhu ay gaaraan dhammaan dalka.



MAAJO 10, 2023

DAAH-FURKA SANDUUQA WADAJIRKA AH EE SOOMAALIYA

Waa sanduuq siinaya Dowladda hab lagu hubinayo isla markaana si toos ah ula jaanqaadi kara qorshayaasha hortabinta u leh Qaranka Soomaaliyeed, xoojinayana lahaanshaha Qaranka ee deeqaha horumarinta ee caalamiga ah, iyo in si wadajir ah mudnaan loo siiyo iyo isku dubbaridka isticmaalka kheyraadka sida ugu wanaagsan.



AGOOSTO 29, 2023

DID-U-EEGISTA MUDDADA DHEXE EE QORSHAHA HORUMARINTA QARANKA 9-AAD

Warbixinta oo uu si rasmi ah u daahfuray Ra'iisal Wasaare Ku-xigeenka dalka, Mudane Saalax Axmed Jaamac ayaa faahfaahin buuxda waxa ay ka bixineysaa horumarkii laga sameeyay sanadka 2020 ilaa 2023 ee Qorshaha Horumarinta Qaranka 9-aad.



NOFEEMBAR 26, 2023

KULAMO WADATASHI OO DIB LOOGU CUSBUUNEYSIINAYO QORSHAHA 9-AAD EE HORUMARINTA QARANKA (NDP-9)

Wadatashigan ayaa waxaa lala yeeshay Hey'adaha Dowlad-Goboleedyada, Maamulka Gobolka Banaadir iyo Ururada Bulshada Rayidka iyo Ganacsatada si looga tashado hormarinta, hirgelinta iyo dhammeystirka QHQ-9-aad si xal loogu helo daldaloolo kasta oo jira.



NOFEEMBAR 27, 2023

DAAH-FURKA SADEX MASHRUUC OO LAGU KALA MAGACAABO XALDOON, NEGAAD IYO SEPOW


Diyaarinta Qorshaha Qaran ee Wadiiqooyinka Xalka Waara ee looga saaraayo 1 Milyuun oo barakacyaal xaalada barkaca ee ku jiraan iyada loo adeegsanaayo 6 wadiiqooyin oo ay ka mid yihiin: (1) helida adeegyada asaasiga ah (2) helida shaqo abuur si ay u gaaraan isku filnaasho (3) Dib-u-dejinta barakacayaasha iyada oo dhul iyo guryo la siinaayo (4) Dhisidda adekysiga bulshada ee musiiibooyinka keena barakaca sida colaadaha, isbedelka cimilada oo ay ka mid yihiin daadadka iyo abaaraha (5) Dhisidda awooda Dowladda ee maareynta arrimaha barakacayaasha (6) Helida xogta saxda ah ee barakacayaasha oo dowlada leedahay si xal waara loo gaarsiiyo.



NOFEEMBAR 24, 2023

DADAALADII KU BIIRITAANKA DALLADDA BULSHADA BARIGA AFRIKA

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Soomaaliya ayaa hogaaminaysay daddaaladan iyadoo ka soo cayaartay kaalin wax ku ool xaqiijinta riyadaan rumowday.



DISEEMBAR 11, 2023

KULAMADA WADATASHIGA EE DIB U CUSBOONEYSIINTA QORSHAHA QARANKA IYO WASAARADHA DOWLADA

Kulamada ayaa diiradda lagu saaray wadatashiga ku saabsan dib u cusbooneysiinta Qorshaha 9-aad ee Horumarinta Qaranka (National Development Plan-9), Qorshe- hawleedka Sanadka ee Wasaaradaha kor ku xusan iyo xoojinta wada-shaqeynta wasaaradahan kala dhaxeysa Wasaaradda Qorsheynta Qaranka



MAARSO 07, 2024

ANSIXIYAY HINDISE SHARCIYEDKA XEERKA HAY'ADAHA AAN DOWLIGA AHAYN IYO SIYAASADDA KORMEERKA IYO QIIMAYNTA

Sharcigan waxaa loogu talagalay inuu nidaamiyo, kormeero, iskuna dubbarido howlaha NGO-yada ee dalkeena, lagulana socdo waxtarka si loo gaaro isla xisaabtan dhab ah.



MAAJO 22, 2024

DAAH-FURKA DIYAARINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARAN EE 2025-2029

Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Xamsa Cabdi Barre ayaa si rasmi ah u shaaciyay diyaarinta Qorshaha Isbedelka Qaran kaasoo looga gol leeyahay in Soomaaliya uu gaarsiiyo horumar waara, xasilooni dhaqaale, iyo barwaaqo



JANAAYO 06, 2024

DAAH-FURKA ISTIRAATIJIYADDA WASAARADDA EE SHANTA SANO (2024-2028)

Istiraatiijiyadan ayaa diiradda saareysa fursadaha iyo ka gudubka caqabadaha si loo gaaro yoolalka horumarineed iyo ujeedooyinka istaraatiijiyadeed iyo xoojinta hawlaha Wasaaradda ee dhinacyada horumarinta iyo isku-dubbaridka qorshaynta siyaasadda horumarinta qaranka iyo qaybaha wax ku oolka ah.



ABRIIL 24, 2024

DAAH-FURKA SHIRWEYNAHA MAALGASHIGA IYO BANDHIGA SOOMAALIYA

Ujeedk shirkan ayaa ahaa in lagu soo bandhigo fursadaha maalgashi ee Soomaaliya ka jira, islamarkaana kor loo qaado qulqulka maalgashiga shisheeye iyadoo la dhiirigelinayo maalgashatada Soomaaliyeed ee gudaha iyo kuwa qurba-joogta ah.



